



BERGEN
KOMMUNE

Waaxda xannaanooyinka carruuraha, iskoollada iyo
ciyaaraha

Ku waalidka ardayda gu'ga 2022-ka
dhiganaysa fasallada 1-aad ee iskoollada soo
socda: Trengereid, Møhlenpris, Løvås,
Damsgård, Holen, Fridalen, Kronstad, Flaktveit,
Mjølkeråen, Salhus

Tixraacayaga: 2021/58937-1
Taariikh: 16-ka Diseembar 2021

Warbixin ku saabsan mashruuc tijaabo ah «SFO bilaash u ah fasallada 1-aad»

Boos SFO oo aan buuxin oo bilaash ah iyo boos buuxa oo qiimaha la dhimay

Golaha deegaanka degmada Bergen (Bystyret) wuxuu go'aamiyay in ardayda dhigata fasallada koobaad ee iskoollo gaar ah in la siiyo boos SFO oo aan buuxin oo bilaash ah (kuwii la oran jirey booska gelinka hore/gelinka danbe). Iskoollada uu ilmahaagu dhigto wuxuu ka mid yahay iskoollada la doortay. Kani waa mashruuc tijaabo ah oo socon doona inta u dhexaysa 1-da jannaayo 2022-ka ilaa iyo 30-ka juun 2022-ka.

Nidaamka wakhtiga firaaqada la yahay ee iskoollada – SFO waa deeq wax la qabto wakhtiga firaaqada la yahay oo ardayda loo fidiyo waxbarashada iskoollada ka hor iyo kaddib. SFO waa goob muhiim u ah waxbarashada iyo is-dhexgalka, waxaana la doonayaa in ay carruurta ugu badan ee suurtaggalka ah ka qaybqaataan SFO-ga. Nidaamka bilaashka ah waa boos aan buuxin iyo boos waxbarid [introduksjonsplass]. Dadka ay carruur u dhigato fasalka 1-aad oo horay u aqbalay booska SFO, si otomaatik ah ayay ugu biirayaan mashruuca tijaabada ah – umana baahna in ay mar kale codsadaan.

Waxaa la idinku soo dallici doonaa lacagta cuntada (kr 280,- bishiiba).

Qiime la dhimay

Dadka horey u haystay boos buuxa, si otomaatik ah ayaa qiimaha looga dhimayaa muddadaan tijaabada ah, kr 580,- bishiiba. Qiimahaas oo u dhigma farqiga booska aan buuxin iyo midka booska buuxa.

Haddii uu dakhliga canshuurtu ku waajibtay ee qoysku ka hooseeyo kr 350 000,- waxaad weli xaq u leedihiin boos buuxa oo bilaash ah, haddii aad codsateen in la idinka dhimo lacagta ay waalidku bixinayaan. [Halkan ka codso in lagaa dhimo lacagta ay waalidku bixinayaan](#)

Sii socoshada mashruuca

Mashruuca tijaabada ah wuxuu soconayaa ilaa iyo 30-ka juun 2022-ka. Kaddibna laga billaabo bisha ogoosto waxaa idiin imaan doonta warqad lacag-doon oo caadi ah.

Qofkii doona markaas ayuu booska fasixi karaa, fasixiddaas oo ka billaaban doonta 1-da juun 2022-ka.

Codso boos SFO

Haddii aydnaan weli codsan boos SFO, waxaad ka codsan kartaan [bogga internetka ee degmada Bergen](#). Si otomaatik ah ayaad ugu biiraysaan mashruuca tijaabada ah. Halkaas ayaad sidoo kale ka akhrisan kartaan faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan SFO.

Mahadsanidiin

Marius Arnason Bøe
Agaasime degmo
Waaxda xannaanooyinka carruuraha, iskoollada iyo ciyaaraha